



**Akoonka shirkadaha soo dallaca
biilasha joogtada ah - Koronto,
biyo, Gaas IWM**

myBank
Wherever you go

Ma tahay shirkad bixisa korontada, biyaha, taleefanka ama biilal kale? Waxaan kuu sameynay koonto gaar ah! Sidoo kale, maka shaqeysaa meheradda Telefishanka ee sida billaha ah lacagta lagu bixiyo? Tani waa koontada ugu habboon aruurinta biilasha!

Iyaga oo adeegsanaya xisaabta noocan ah, bill-qaadayaashu waxay helayaan habka ugu sahlan, uguna hufan ee aruurinta biilasha waayo habkan ayaa u suurtoogelinaya macaamiisheenna - iyaga oo adeegsanaya, aaladaha digital ka ah - in ay si toos ah uga saaraan lacagta biilka koontooyinkooda, uguna wareejiyaan xisaabta biil-qaadaha, iyada oo farriinta lagu ogeysiinayo lacag-bixinta loo dirayo biil-bixiyaha iyo biil-qaadaha labadaba, isla markaana la update garaynayo nidaamka xisaabaadka ee biil-qaadaha si macmiilka looga dejiyo biilkii uu bixiyay, si otomatik ah. Waxaas oo dhani waxa ay dhacayaan dhowr ilbiriqsi gudahood, iyada oo loo isticmaalayo hanaan dhaqso badan, amnigiisu suganyahay, la iskuna halleyn karo.

Faa'iidooyinka Akoonkan:

- Jeeg buug ka kooban 100 xaashi.
- Haddii aan shirkaddaadu lahayn system electronic ah oo ay ku maamulato xisaabaadka, waxaan siinaynaa, kuna tababaraynaa system lacag la'aan ah oo ka caawin doona in ay si digital ah u maamulaan xisaabaadkooda, isla markaana biilasha kaga qabtaan macaamiisha hab online ah.
- Statement ga akoonkaaga oo si bille ah laguugu soo diro si otomatik ah.
- Si sahlan oo lacago lagaaga soo diri karo, isla markaana aad ugu dirsan karto dibedda, adiga oo adeegsanaya adeegga Swift, iyo kannaallada kale ee casriga ah ee lacagaha la isugu diro.
- Amar lacag-bixin joogto ah oo aad hal mar bixin karto, deedna bil ama sitimaan kasta si otomatik ah lacagtii looga wareejinayo akoonkaaga, lana dhigayo akoonka ciddii aad dalbatay in lagu wareejiyo. Lacagaha aad habkan ku wareejin karto waxaa ka mid ah kirooyinka iyo mushaarka shaqaalaha IWM.
- Internet banking kuu sahlaya in aad akoonkaaga maamulato goor kasta iyo goob kasta oo aad joogto.
- SMS lagugu soo wargelinayo dhamaan transactions-ka ka dhaca akoonkaaga.

- 24-ka saac iyo 7-da maalin ee sitimaanka oo aad si online ah ula sheekaysan karto shaqaalaha bankiga, si ay kaaga caawiyaan wixii cillada, cabasho ama su'aal ah ee aad qabto. Shaqaalaha bankiga waxa aad kula hadli kartaa website-ka bankiga, Facebook iyo WhatsApp.
- Mushaarka shaqaalaha oo aad ku bixin karto si online ah.
- Waxaa lagu samaynayaa qof aad si gooni ah ugala soo xiriirto dhamaan waxyaalaha aad bankiga uga baahato.
- Waxa aad ka faa'iideysan kartaa hababka maalgelinta ee ee bankiga.

Shuruudaha Furista Afoonka:

1. Aqoonsiga (National ID ama passport) milkiilayasha/agaasimayaasha Shirkadda.
2. Koobi xeer-hoosaadka lagu aasaasay Shirkadda.
3. Laysanka Shirkadda.
4. Cinwaanka Shirkadda.
5. Caddaynta/faahfaahinta nooca ganacsiga.
6. Labo sawir oo nooca passport-ka ah oo laga rabo cid kasta oo afoonka saxiixaysa.
7. Aqoonsiyada (ID, Passport IWM) cidda afoonka saxiixaysa (Haddii ay ka duwanyihiin milkiilayaasha/agaasimayaasha Shirkadda).
8. Warqad codsi ah oo milkiilayaashu/agaasimayaashu u soo qoraan bankiga





 7777  +252 1 847777 | +252 62 3737777

 +252 61 3737777

 info@mybank.so

 www.mybank.so

  [MyBank.so](https://www.facebook.com/MyBank.so)

 [MyBankso](https://twitter.com/MyBankso)

Head Office / Branch Location
Mogadishu, Somalia

My